




(uten bilder)

Ann Nduku ✎
Wiehan de Jager 📧
Anwar Mohamed Dirie 📧
somiali 🗨️
nivå 3 📖



Digaagad iyo Galayr

Barnebøker for Norge

barnebok.no



Digaagad iyo Galayr

Skrevet av: Ann Nduku

Illustrert av: Wiehan de Jager


Oversatt av: Anwar Mohamed Dirie

Denne fortellingen kommer fra African Storybook (africanstorybook.org) og er videreformidlet av Barnebøker for Norge (barnebok.no), som tilbyr barnebøker på mange språk som snakkes i Norge.


Dette verket er lisensiert under en Creative Commons

[Navngivelse 3.0 Internasjonal Lisens.](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.no)


<https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.no>




Mar waayihi hore kamid ah, Digaagad iyo Galayr ayaa saaxiibbo ahaa. Waxa ay nabad oo la noolaayeen shimbiraha kale oo dhan. Midkoodna ma duuli karin.




Marka uu hooska baalasha galayrka dhulka ka soo muuqdo, Digaagaddu waxa ay u digtaa boojaalaheeda. “Ka tagga dhulkan banaan ee qalallan.” Iyaguna waxa ay ugu jawaabaan: “Doqommo ma nihin. Waan carari doonnaa.”




Hal maalin, ayaawaxaa dhulka ka jirtay
abaar. Galayrkii waxa ay u socotay meel
aad u fog si ay cunto u hesho. Waa ay soo
noqotay iyada oo aad u daallan. "Waa in
ay jirtaa si sahlan oo loo safro!" Ayay tidhi!
Galayrkii.




Markii ay Dafadii timid maalinkii dambe,
waxa uu arkay Digaagaddii oo carrada
faagaysa, laakiin aan irbaddii hayn. Sidaa
darteed galayrkii si degdeg ah ayay hoos
ugu soo duushay oo dafay mid ka mid ah
carruurta. Waa uu la duulay. Abid markaa
ka dib, mar walba u galayrka soo
muuqato, waxa ay aragtaa Digaagadda oo
carrada faagaysa oo irbaddii ka
raadnaysa.




Habeen ay si fiican u seexatay ka dib, Digaagaddii ayaa caqli fiican heshay. Waxa ay bilowday uruurinta baalasha ka daatay shimbiraha saaxiibbadeed ah oo dhan. "Aynu ku tolno dusha baalasha kuwa naga," ayay tidhi. "Malaha taas baa sahli in la safro."




"Bal hal maalin isii," ayey Digaagaddii afadii ka bariday. "Dabadeed waa aad giigsan doontaa baalashaada oo duuli doontaa mar kale si aad cunto u soo hesho." "Maalin keliya uun baad haysataa," ayey tidhi Galayrkii. "Haddii aad irbadda heli weydo, waa in aad magdhaw ii siisaa carruurtaada midkood."




Galayrkii ayaahayd mida keliya tuulada ee heysata irbad, marka iyada ayaamarkii koowaad baalashii isku toshay. Waxa ay sameysatay laba joog baalal ah oo aad u qurxoon kor ayeyna u duushay digaagada korkeeda. Digaagaddii waxa ay soo amaahatay irbaddii laakiin dhakhsoba wey ku daashay toliinkii. Waxa ay irbaddii uga tagtay armaajada korkeeda waxa ayna u kacday jikada si ay cunto ugu diyaariso ilmaheda.



Mar dambe gallaprkii, aye galarvkii soonogotay. Waxa ay weydiisay irbaddii si ay u hagaajiso baalal kasoo dabgay intey safarka ku jirtay. Digaagaddii waxa ay ka eegtay armaajadii. Waxa ay ka eegtay jikadii. Waxa ay ka eegtay daradda. Laakiin irbaddii meelna lagama helin.



Laakiin shimbirihii kale ayaa arkeen Galayrkii oo duulaysa. Waxa ay ka codsadeen Digaagaddii in ay amaahiso irbadda si ay iyaguna baalal u sameystaan. Markiiba waxa la arkay shimbiro duulayo meel kasta samada.



Markii uu shimbirkii ugu dambeeyey soo celiyay irbadda amaahda aheyd, Digaagaddu ma joogin halkaa. Marka ilmaheedii ayaa irbaddii qaatay oo bilaabay waxayna billaabeen in ay ku ciyaaraan. Markii ay ku daaleen ciyaartii, irbaddii waxa ay uga tageen carrada dhexdeeda.